

Ka fakar Jadeecada Maaha keliya finan yar

Jadeecada ayaa khatar noqon karta, gaar ahaana ku noqon karta ilmaha yaryar iyo carruurta yaryar, haweenka uurka leh iyo dadka nidaamkooda difaacu liito.

Jadeecadu waa Xanuun aad U Faafa

Jadeecada ayaa ku faafta hawada marka qofka xanuunsanayaa uu qufaco ama hindhiso. Waxay si degdeg ah oo fudud ugu faafi kartaa meelaha saxmada ama ciriiriga badan.

Astaamaha jadeecada waxaa caadiyan kamid ah:

- › Qandho saraysa taasoo taasoo gaari karta ilaa 40 digrii Celsius
- › Qufac iyo biyo sanko ka socda
- › Indho xanuun/indho gaduudasho
- › Oomateed la'aan
- › Daal, camal xumo iyo luminta guud ee tamarta
- › Finan – waxay caadiyan kasoo baxaan madaxa iyo qoorta marka koobaad waxayna ku faafaan qaybaha kale ee jirka



Waxaad awood u leedahay inaad inaad difaacdo naftaada iyo qoyskaaga.

Hel difaac badqab leh oo muddo dheer socda oo ka dhan ah jadeecada adoo xaqiijinaaya in adiga iyo qoyskaagu aad qaadataan labada kuuro ee lagu talinaayo ee ee talaalka jadeecada-qaamow-qashiinka iyo rubella (MMR).

Marna ha u malayn inaad kasoo daahday - la hadal dhakhtarkaaga ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee HSE si aad u hesho talaalka **bilaashka ah** ee MMR ee ka daba-tagta ah.

Xog dheeri ah oo ku saabsan jadeecada iyo talaalka MMR ayaad ka helaysaa barta [hse.ie/measles](https://www.hse.ie/measles)



Find your nearest clinic here

